

Safarka dibadda iyo faragelinta shisheeye

Marka ay dibadda u safrayaan dadka qaarkood waxay la kulmi karaan faragelin shisheeye iyada oo loo marayo dabagal dheeraad ah oo ay sameeyaan hay'adaha shisheeye oo ay ku jiraan hay'adahooda amniga iyo sirdoonka.

Waxaa muhiim ah in la xasuusto in inta badan dadka safarka ah aysan la kulmin arrintan iyo in baaritaannada lagu sameeyo xuduudaha ay yihiin kuwo caadi ka ah adduunka oo dhan badanaana ay yihiin kuwo joogto ah oo aan la xiriirin faragelin shisheeye.

Dadka laga yaabo in lagu sameeyo dabagal dheeraad ah oo la xiriira faragelin shisheeye waxaa ka mid ah:

- dadka lagu bartilmaameedsaday gudaha New Zealand
- xubnaha bulshada ee la og yahay inay qabaan aragtiyo ka soo horjeeda ama dhaliila dowlado shisheeye
- hoggaamiyayaasha bulshada, u-doodayaasha iyo dhaqdhaqaaqayaasha
- xubnaha bulshada ee u safa arrimo qoys, bulsho, ama ganacsi
- xubnaha bulshada ee u shaqeeya Dowladda New Zealand, goleyaasha dowladaha hoose ama ah masuuliyiin la soo doortay gudaha New Zealand
- xubnaha bulshada ee ka shaqeeya waaxyo kale oo muhiim ah tusaale ahaan kaabayaasha muhiimka ah, tacliinta sare, iyo warbaahinta
- qaxooti hore.

Dadku waxay la kulmi karaan khataro iyadoo ku xiran dalka, sida:

- in si aan loo baahnayn su'aalo kuugu weydiyaan hay'adaha maxalliga ah tusaale ahaan ku saabsan qorshayaasha safarka, hawlahaaga, ama xiriirradaada
- in lagu diido gelitaanka ama bixitaanka, sida in lagu diido raacitaanka duulimaadyada ama gelitaanka goobaha kantaroolka xuduudaha
- in lagugu soo rogo xayiraado safar ama fiise, oo ay ku jiraan xaddidaado lagu saaro dhaqdhaqaaqaaga gudaha dalka
- in la baaro qalabka elektaroonigga ah oo ay ku jiraan taleefoonnada, kombiyuutarrada la qaadan karo, ama qalab kale taas oo ku jiri karta helitaanka macluumaadkaaga gaarka ah ama isgaarsiintaada
- muraaqabayn beegsi ah, xirid, ama xabsi gelin kadib marka qofku timaado, taas oo ay ku jiri karaan talaabo sharci oo rasmi ah

- in la waajaho caga juglayn, dhibaatayn, ama hanjabaado ka yimaada maamullada deegaanka
- in lagugu qasbo su'aalo badan, dhibaatayn ama caga juglayn oo ay gaystaanl kooxaha maxaliga ah, maaha keliya ciidanka booliiska ama maamullada maxaliga ah.

Caawimada qunsuliyadda New Zealand

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Ganacsiga (MFAT) waxay siisaa adeegyo qunsuliyadeed muwaadiniinta New Zealand ee ku sugan dibadda New Zealand xitaa haddii aysan caadi ahaan ku noolayn New Zealand.

Caawimada qunsuliyadda guud ahaan lama siiyo Deganaansho Joogto ahayaasha New Zealand.

Muwaadiniinta New Zealand ee ku sugan dibadda waxay hoos yimaadaan sharciyada dalka ay joogaan oo ay ku jiraan sharciyada dalkaas ee khuseeya xabsi ku haynta, dacwad oogista, ama xaddidaadaha safarka.

Muwaadiniinta Laba Dhalasho leh

Haysashada laba dhalasho waxay saameyn ku yeelan kartaa awoodda New Zealand ee bixinta caawimada qunsuliyadeed. Marka uu qofku joogo dalka dhalashada kale ee uu haysto hay'adaha maxalliga ah waxay ula dhaqmi karaan oo keliya muwaadin dalkooda ah mana oggolaan karaan faragelinta New Zealand.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa Safe Travel: [Muwaadiniinta Laba Dhalasho leh iyo Degananayaasha sharciga ah](#)

Qaxootiga iyo Qaxootigii Hore

Haddii aad tahay qaxooti ku sugan meel ka baxsan New Zealand waxaa jira xaddidaado waaweyn oo ku saabsan taageerada ay Dowladda New Zealand ku siin karto.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa Safe Travel: [Qaxootiga iyo Qaxootigii Hore](#)

SafeTravel NZ

[SafeTravel NZ](#) waa mareegta rasmiga ah ee MFAT ee loogu talagalay muwaadiniinta New Zealand ee safarka ku jooga ama ku nool dibadda waxayna bixisaa talooyin safar, adeegyo qunsuliyadeed, tilmaamo badbaado, iyo nidaam diiwaangelin oo loogu talagalay dadka safarka ah.

Dadka safarka ah waa inay iska diiwaangeliyaan [SafeTravel New Zealand](#) kahor intaysan u safrin dibadda. Tani waxay ka caawisaa MFAT inay bixiso warar cusub oo waqtigooda ku habboon, la xiriirto dadka safarka ah haddii loo baahdo, oo ay bixiso caawimo halka ay

suurtagal tahay.